

### SUNAAMIYADA

Sunaamiyada waa hirar badweynta ka yimaada oo ay abuuraan dhulgariirro ama dhulgo'yo ka dhaca dhulka hoostiisa. Eraygu waa eray Jabbaan ka yimid oo micnihiisu yahay "hir marseed/dekadeed" waxaana sidaa loo yiri saamaynta kharribaadda ah ee ay hirarkani ku yeeshaan bulshooyinka xeebaha sheebaha ah deggan ee reer Jabbaan. Sunaamiyada waxaa inta badan si khaldan loogu yeeraa hirkacyo.

Sunaamiyada, oo khatarta ugu weyn ku ah aagagga ka yar 25 fiit oo heerka badda ka hooseeya, oo kuna yaalla meel hal mayl u jirta hiriqa xeebta ayaa waxay sababi karaan:

- Daadad dhaca.
- Biyaha la cabbo oo sumooba.
- Dab ka dhasha haamaha iyo tuubbooyinka gaaska oo dillaaca.
- Lumidda kaabe bulsho oo wax-ku-ool ah.

Geerida ugu badan ee ay sababaan sunaamiyada waxay ka imaadaan biyo ku bakhtiyid.

Ilaa iyo 1945, lix sunaami ayaa Hawaii, Alaska, iyo Xeebta Galbeed ku diley in ka badan 350 qof oo sababayna lumidda hanti u dhiganta 500 oo milyan. Afar iyo labaatan sunaami ayaa burbur ka geystay Maraykanka iyo dhulalkiisa intii lagu jirey 224tii sanadood oo ina dhaaftay.

Sunaamiyada waxay farraqyo xeebeedyada iyo webiyada ugu socon karaan si lid-hireed (qulqulka ka hor imanaya) ah iyagoo wata hirar wax burburiya oo ugu sii fidaya dhinaca duurka si ka badan docaha xeebta. Sunaami waxay dhici kartaa xilli kasta oo sanadka ka mid ah iyo waqti kasta, habeen ama maalin.

Hirka ugu horreeya ee sunaamidu inta badan maaha kan ugu ballaaran hirarka is-xigxiga mana aha kan ugu saamayn badan. Hal bulsho oo xeeb deggen ayaanay hirarku wax u dhimi karayn, meesha ay mid kale oo aan sidaa uga fogeyn la kulmi karto hirar geeri iyo burburba keenaan. Iyadoo ku xiran saameeyayaal badan, qaar ka mid ah meelaha ku yaal sheebaha ayaa la kulmi kara biyo badan oo berriga ku qarqiya iyo qashin uu jooggoodu gaaro in ka badan 1,000 fiit.

Digniinaha sunaami waxay ka soo baxaan laba hay'adood:

- Xarunta Digniinta Sunaamida ee Xeebta Galbeed/Alaska (The West Coast/Alaska Tsunami Warning Center: WC/ATWC) waxay masuul ka tahay digniinaha sunaami ee California, Oregon, Washington, British Columbia, iyo Alaska.
- Xarunta Digniinta Sunaamida ee Baasifigga (The Pacific Tsunami Warning Center: (PTWC) waxay masuul ka tahay digniin siinta madaxda caalamiga ah, Hawaii, iyo dhulalka Maraykanka eek u yaal godinka Baasifigga.

Labada Xarumood ee Digniinta Sunaamida waxay agaasimaan xogta la faafinayo.

**SUNAAMIYADA (WELI SOCDA)**

Samee waxyaabaha soo socda si aad ugu diyaar-garowdo sunaamida:

- Ogow khatarta sunaami ee aagga. Ogow dhererka jidka aad degan tahay ee ka sarrayntiisa heerka badda iyo fogaanta uu jidkaasu u jiro xeebta iyo biyaha kale ee halista sare leh. Amarrada guuridda ayaa ku salaysnaan kara cabbirradaas.

Haddii aad booqanaysid carro ugu jirta halis sunaamida, weydii shaqaalaha huteelka, muteelka, iyo kaamka xogta daad-guraynta.

- Qorshee oo ku tababbaro wadiiqooyinka lagu baxo. Hadday suuroggal tahay, dooro meel boqol fiit am aka badan ka sarraysa heerka badda, ama ugu yaraan laba mayl gudaha berriga oo ka fog hiriqa xeebta u bax. Waa in aad meesha aad ku bedbaadayso ku gaari kartid 15 daqiiqo oo lugayn ah. Awood u yeelo in aad qaadi kartid marinkaaga fakashada habeenkii iyo cimilo kacsan markii lagu jiraba.
- Qoyskaaga kala sheekayso sunaamida. Kala sheekaysiga qoyskaaga sunaamiyada iyadoonay dhicin waxay yarayn doontaa cabsida iyo walbahaarka waxaanu qof kasta awoodi doonaa in uu sameeyo waxa ku habboon. La muraajicee nabdoonaanta iyo u diyaarsanaanta daadadka qoyskaaga.
- La hadal wakiilkaaga caymiska. Caymiska Mulkiile-guri (Homeowners' policies) ma daboolaan daadadka sunaamida. Wax ka weydii wakiilkaaga caymis Barnaamijka Caymiska Daadadka ee Qaranka (National Flood Insurance Program: NFIP).
- Isticmaal raadiyaha cimilada ee NOAA oo leh qayb digta markay wax dhacaan si aad uga warhayso dhawrida iyo digniinaha maxalliga ah.

Dariiqooyinka lagu ilaashado hantida:

- Iska ilaali dhisashada ama ku noolaashada dhismayaasha dhawr boqol ee fiid u jira hiriqa xeebta. Aagaggaasi waxay u badan yihiin in ay dumitaan kala kulmaan sunaamiyada, dabaylaha xooggan, iyo duufaan xeebaadyada.
- Sare u qaad quryaha xeebta. Inta badan hirarka sunaami way ka gaaban yihiin 10 fiit.
- Raac taxaddarrada diyaarsiga cuntada. In badan oo ka mid ah taxaddarrada u habboon daadadka ayaa iyagana u habboon sunaamiyada.
- Kala tasho xirfadle oo ka hel talada dariiqooyinka aad gurigaaga uga dhigi karto mid biyaha iyo sunaamidaba iska caabbin kara. Waxaa kaloo jira dariiqooyin gurigaaga looga weecin karo hirarka.

### SUNAAMIYADA (WELI SOCDA)

Haddii uu dhulgariir xooggani dhaco:

- Dhac, isded, oo qabso. Waa in aad naftaada ka ilaalisaa dhulgariirka marka hore.
- Markii ay ruxashadu istaagto, ururso xubnaha qoyskaaga oo degdeg u guura. Wax kasta ka taga. Sunaami ayaa ku dhici karta daqiiqado gudahood. Degdeg ugu guura meel sare oo xeebta ka fog.
- Ka fogow baallooyinka dhacay, kana dheerow dhismayaasha iyo buundooyinka ay waxyaabaha culusi ka soo dhici karaan ruxashada dambe inta lagu jiro.

Tallaabooyinka la qaado:

- Haddii aad joogto aag khatarta sunaami ay ka jirto oo aad maqasho digniin sunaami oo rasmi ah ama aadba aragto calaamado sunaami, markiba guur. Digniinta sunaami waxaa la bixiyaa markii ay madaxdu habsato in ay jirto halis dhab ah oo sunaami, markaana waqtiga lagu baxayo wuu yaraan karaa.
- Raac tilmaamaha ay bixiyaan madaxda maxalliga ah. Wadiiqooyinka fakashada ee la doorbiday waxay ka duwanaa karaan kuwii kuu qorshaysnaa, ama waxaa lagu talin karaa in loo guuro meel ka sarrayso meeshii aad qorshaysatay.
- Gaar meesha ugu dheer xeebna ugu fog ee aad gaari kartid. Saraakiishu si dhab ah uma saadaalin karaan joogga iyo saamaynaha ay maxalli ahaan ku yeelan karto sunaamidu.
- Xog gurmada oo joogtaysan ka dhegayso Raadiyaha Cimilada ee NOAA ama saldhigga ay ka hadlaan waardiyaha xeebaha (Coast Guard) gurmaddoodu.
- Guriga ku noqo keliya markii ay saraakiisha maxalliga uhu ku dhahaan way nabdoon tahay noqoshadu. Sunaami waa hira isdaba-joog ah waxayna socon karaan saacado. Ha u qaadan in hal hir ka dib, ay dhamaatay khatartii. Hirka soo socdaa ka weynaan karaa kii hore.

Sunaami dabadeed, muwaaddiniintu waa in ay xogo joogtaysan iyo tilmaamo ka sii dhegaystaan Raadiyaha Cimilada ee NOAA ama saldhigga ay ka hadlaan waardiyaha xeebaha (Coast Guard) Sida halisyo kale oo jira, tallaabooyinka sunaami-dabadeed wax aka mid ah:

- Ka dheeraashada baallooyinka korantada oo soo dumay ama fiilooyinka go'ay ee yutiiliti iyo in markiiba la sheego kuwaad aragto.
- Ka joogidda meelaha dumay inta lagaaga sheegayo in ay nabdoon tahay in la galo.
- Ka joogidda dhismayaasha dumay.
- Isticmaalidda toosh si burburka iyo halista dabka loo raadiyo iyo diiwaangelinta burburka si dano caymis awgood.

**SUNAAMIYADA (WELI SOCDA)**

- Deminta yuutilitida oo dhan, hadday muhiim noqoto.
- U xajinta tilifoonka arrinta gurmadka.

**Beenta iyo Runta Sunaami**

<b>Been:</b>	Sunaamiyada waa gidaarro waaweyn oo biyo ah.
<b>Run:</b>	Sunaamiyada caadiyan waxay leeyihiin muuqaalka daadad degdeg u kacaya oo degaya. Waxay la mid noqon karaan wareeg-hireed dhacaya in ka badan 10-60 daqiiqo meeshii 12 saacadood. OMararka qaar, sunaamiyada waxay samayn karaan gidaarro biyo ah oo loo yaqaan cimlaaqyada sunaami, waana markii ay hirarku sidaa u dheer yihiin sida uu hiriq-xeebeedku u samaysan yahayna ay ku habboon tahay.
<b>Been:</b>	Sunaamiyada waa hal hir ah.
<b>Run:</b>	Sunaamiyada waa hirar is xigxiga. Badanaa hirka billowga ah maaha kan ugu weyn. Hirka ugu weyn wuxuu dhici karaa dhawr saacadood ka dib marka dhaqaaqa billowga ahi uu ka dhaco meel xeebta ah.
<b>Been:</b>	Doomuhu waa in ay gabbaad u doontaan gebi ama marso (dekad) xilliga ay dhacdo sunaami.
<b>Run:</b>	Sunaamiyada waxay inta badan aad u dumiyaan oo u kharribaan aagagga gebiyada iyo marsooyinka. Sunaamiyada waxay ugu wax-dhimid yar yihiin biyaha moolka ah ee furan ee badweynta.

**[THIS PAGE WAS LEFT INTENTIONALLY BLANK.]**